



## Dugsiga Martin Luther King Jr. School oo u dabaaldegaya sanad guurada 50<sup>aad</sup> ee magac bedelka

Waxaa laga joogaa 50 sanadood tan iyo markii arday dareen xoog leh qabaa ay horseedeen dhaqdhaqaaq si dugsigoodu loo siiyo magaca Martin Luther King Jr. Toddobaadkii la soo dhaafay, bulshada ayaa si xoog badan iskugu soo baxday si u muujiyaan qadarin, isla markaana u Dr. King ugu maamuusaan dabaaldeg weyn oo ka dhacay dugsiga.

Waxaa loogu yeeray “Celebrate the Legacy” iyada oo boqolaalkii dad ahaa ee ka soo qay galay ay ku raaxaysteen bandhigyo arday, muusik toos ah, madxafka guurguura ee taariikhda dadka madow, iyo casho dhaqameed gaar ah.

Saddex ka mid ah ardayda fasalka sideedaad ee 1968-kii ayaa dadka isku yimid u sharaxay sida iyaga iyo asxaabtoodu ay go'aansadeen in ay raadsadaan magac bedelka wax yar ka dib markii dilkii Dr. King. Kaliya 20 cisho ka dib, kooxdu waxay guddiga dugsiga u soo bandhigeen soo jeedintoodii iyo saxiixyadooda codsiga rasmiga ahaa. Dugsiga Highland wuxuu ku sii jeeday in uu noqdo mid ka mid ah dugsiyada ugu horreeya ee dalka ee qaata magaca Martin Luther King, Jr. Hadda, 50 sanado badan ka dib, waxaa si joogto ah loo xasuusiyay muhiimada ay leedahay guulaha ay gaareen.

“Xaqiiqda ah in riyadii Dr. King ay nooshahay, waxaan aad ugu faraxsanahay in aan qayb ka ka ahaado taasi,” ayay sheegtay Cathy Adams.

“Markasta oo ay murugo i hayso, waxaan ka fikiraa waqtiyadaasi, iyada oo taasi kor ii qaada,” ayuu sheegay Tim Wilson. “Taasi waxay ahayd wax weyn. Dr. King weli wuxuu ku nool yahay quluubteena.”

Bulshada dugsiga waxay saacado badan ku bixiyeen u diyaargarowga habeenka weyn. Maktabadda waxaa loo rogay naadi muusikada ‘jazz club’, halkaasi oo heesaaga LaRhonda Steele ay la heestay kooxdeeda. Qoob-ka-ciyaarayaal ka socday Afrikada galbeed ayay la ashqaraareen dadkii ku sugnaa kafateeriyada iyada laba kooxood ay muujiyeen xirfadahaaga. .

Macallimada fasalka saddexaad Melodie Adams ayaa horseed ka ahayd dadaalka wax qorsheynta. Waxay sheegtay in wax baristii Dr. King ay maalinta kasta saameyn ku leedahay manhajka iyo dhaqanka dugsiga. “Martin Luther King wuxuu muhiimada siinayay dib u soo celinta caddaaladda, aan rabshada lahayn, waxaan isku daynaa in aan carruurteena halkan ku barno dhammaan noocyadaasi mabaadii.

Dr. King wuxuu garanayay muhiimada codka ardaydu u lahaa dhaqdhaqaaqa xuquuqda madaniga ahaa. “Celebrate the Legacy” wuxuu ahaa sabab kale oo lagu maamuuso fikraha ixtiraamka leh, caddaaladda bulshada, wax iska caabinta nabada ku dhisan, iyo awoodda waxbarashada ee aasaaska u ah dhismaha Dugsiyada Dadweynaha Portland ee magiciisa xambaarsan.

*-David Northfield*